Xanuunka Autism Isbektiram (Autism Spectrum Disorders ama ASD) Su'aalaha Badiya ay Weydiyaan Qoysasku

Adeeg bixiyaha ilmahayga ayaa ila wadaagey welwel ka qabitaan ku saabsan wiilkeyga kobaciisa iyo dabcigiisa. Waxaan aqoonsaneyn annagu in u leeyahay dib-u-hadh isaga oo ka duwan carruurta kale ee laba jirka ah. Waxaan isleenahay aad ayuu u yarayahay in loo keeno dhakhtar ku takhasusey arrimhaas si loo garto waxa cudurka yahay. Waxaan jecelanahay inaan sugno ilaa hal sano oo kale si aan u aragno bal sida uu u kobco. Ma dhibaato ayey leedahay sugitaankaasi?

Cilmi baadhistu wey iska cad tahay in horey wax uga-qabashadu ay bilaabanto si horey ah intii la karo in arrimo ay guuleystaan. Hase yeeshe, waa muhiimin qoysasku sameeeyaan go'aan ay ku kalsoon yihiin marka la eego ilmahoda. Qiimeynta baadhitaanka ASD uma aha ilmaha jidhkiisa wax xanuun leh. Waa arrimo isugu jira fiirsasho dabci, imtixaan waxbarasho, wareysiga qoyska. Qoysaska inta ugu badni waxay ku soo waramaan niyadda oo u dagtey kadib marka ay soo maraan qiimeyntaa baadhitaan sabata oo ah waxay gartaan in ilmahoodu laga heley xanuunka iyo in kale si ay ugu bilaabaan adeegyada ku habboon haddii loo baahdo.

Adeegyada horey wax uga-qabashada ay is yidhaahdaan ee ku yaal agagaarka ee kooxda horey wax uga-qabashada ee Ubadku Ma-sugi Karaan (ACC) wey habboon tahay ayaa loo bilaabi doonaa haddii la soo baadho iyo haddi kaleba. Waxa jira habab iyo xeelado badan oo waxa laga yaabaa in lagu shaqeysto. Xeeladha qaarkood ayaa ah qaad so wa u tilmmaaid toos ah. Qaarka kalena waxa u baahan yihiin ka qayb qaadashada qoyska. Waxase ugu muhiimsan in arrimahaas khaasatan uga soo baxa in oo ay farta saareen qoysku ayaa arrintiisa la galaa oo barnaamij ku habboon loo dajiyaa. Hase yeeshee, qiimeynta baadhitaanu aad ayey kooxaha iyo qoyskaba waxta ugu yeelan kartaa maadaama ay hor kacayaan noocyada adeegyo, xeelado, iyo istraatijiyada ugu wanaagsan. In kasta oo baadhitaan cudur helitaan aan loogu baahneyn in helo adeegyo, haddna qiimeynta baadhitaan iyo faritaanka wax ka-qabashada marka danebe ayaa waxtar u leh kobcidda hadhow ee barnaamijka.

Ilmahayga baadhitaan ayey ACC ku sameysey oo kooxdooda ayaa welwelsan dhictaanka jiritaan ASD. ACC miey bixin kharashka baadhitaanka si loo garto in ilmahaygu leeyahay ASD.

Marka kooxda ACC gartaan in loo baahan yahay baadhitaan buuxa oo cudurka lagu garto iney habboon tahay, waxa qiimeynta hore lagu dari doonaa adeegga ACC ahaan ilmaha Qoyska Qorshooda Adeeg ee Gaarka ah (IFSP). Taasi waxay ka dhigan tahay barnaamijka ayaa ka mas'uul ah wax bixinta adeeggan baadhitaan. Waa lama huraan in qiimeynta baadhitaan lagu sameeyo isbahaysi lala yeesho horeeyaha daryeele dhakhtar ee ilmaha.

Hore wax uga-qabashadu mey bogsiisaa Xanuunka "Autism" Isbektiramka?

Ma jiraan barnaamij waddanka laga wada yaqaan oo leh macluumaad cilmi baadhis ku filan kuna saabsan carruurta yar-yar oo sheegan kara bogsiinta "autism"ka. "Autism", marka la qeexayo, waa itaal-yareyn (disability) nolasha waligeed jireysa. Iyada oo xidhiidh la leh ka duwanaansho ku dhalahsada iyo maskax ahaan madaxa ilmaha awgeed, ma jiraan wax "bogsiin" ah marka laga hadlayo arrimaha caafimaadka ka duwanaanshahan. Iyada oo la sameeyo wax ka qabasho habbon, dabciyo badan oo lagu timmaamo ASD ayaa ayaa sida toosan loogu beddeli karaa. Cilmi baadhista waxay tuseysaa wax ka-qabashada horranta iyo xoog-saaridda lehi carruur badan ayaa sameysa horumar wax ku ool ah oo markaa gala barnaamijyada dugsi-ugu-horeeyaha iyada heerarkala duwan oo taagero ah la siinayo.

Waa maxay ku hagaagga waxtarka ugu badani?

Ku hagaag kaliyihi waxtar uma laha carruur oo idil. Cilmi baadhistu waxay tuseysaa barnaamij waxbarsho oo khaas ah, qaab ka war-haynna leh oo ku nuuxnuuxsanaya xirfadaha wada xidhiidhka iyo bulsho dhex-galka oo loogu talagaley ilmaha shakhsi ahaantiisa oo soo saari natiijooyin qumman. Xubnoyaahsa qoyskuna waa iney ka ka fakaraan doorka ay ka qaadanyaan barnaamijka marka la qiimeynayo waxtarka. Su'aalaha ya ka midka yihiin " imisa wakhti iyo khyraad ah ayaa looga baahan yahay qoyska sidii loo fulin lahaa ku hagaagyada khaaska ah?" waa in laga fakaro. Ku hagaagyada la gartey iney ugu waxtar badan yihiin waa kuwa ay ku jiraan barnaamij isku duba-ridan oo ay iskugu jiraan ilmaha iyo qoysku. Barnaamijyadu waa iney ka tarjumaan waxay qoysku tabanayaan, ay ugu horeysiinayaan, gud ahaan qiiha la leh oo waa in fidiyaashu giddi hirgaliyaan. Xataa marka lagu daro xubnaha qoyska.

Sideen ku garan karaa ku-hagaagga daaweynta ilmahaygu ee u wanaagsan ilmahayga?

Tani waa su'aasha ugu adag iney ka jawaabaan qoysasku oo isbaddeli doonta kolba wakhtigu marka u sii socdo. Badiyaa, Ku-hagaagga ugu wanaagsani waa ku-haaggyo isku dhe-jir ah. Waxa u shaqeeya hal ilmo ah lagama yaabo in u shaqeeyo ilmo kale. Waxa hal bil ah shaqeeyaa waxa laga yabaa inuuna u shaqeyn lix bilood isla ilmahaas. Waalidka waxa lagu waaniyaa iney noqdaan isticmaalayaal wangaasan oo ah wax ka-qabashada ilmahoodu helo. Taas waxa ugu jirta wada hadal u socda had iyo jeer daaweynta iyo ku –hagaagyada la kala dooran karo ilmahoodu helayo. Marka la laga fakarayo daaweynta ku-hagaaggyadooda, xubnayaahsa qoysku waxay u baahan yiin iney isweydiiyaan ooy filaan ineyhelaan jawaabahooda kuwan oo kale ah:

- Maxaa daaweynta waxtarkeeda toosan ah oon rajeynayaa inaan arko?
- Ma jiraa waxyaabo la socda daaweynta oo waxyeelo yeelan kara?
- Waa maxay waxtarka wakhtiga dhow iyo ka fogba ee aan ku arki daaweynta?
- Can this treatment be integrated into my child's current program?
- Daaweyntan ma lagu dari karaa barnaamijka hadda jira ee ilamahayga?
- Qiimaha Daaweyntu waa imisa? Shirkadda caymiskeygu miyey bixin daaweynta?
- Intee in le'eg oo wakhti ah ayey daaweyntu qaadan doontaa? Caqli gal miyaa inaan u hogaansanaado wakhitiga looga baahan yahay daaweynta?
- Muxuu dhakhtarkeyga carruurta ee ilmahaygu iyo kuwa xirfadda u leh ee ku lug leh arrimaha ilmahaygu ay maleynayaan habboonaanta daaweyntani?

- Ma jiraan cilmi baadhis si aada loo aamminsanyahay oo shegeysa xaqiiq sayniska ku fadhida oo taageereysan isticmaalka daaweyntan?

Sideen ku garan karaa in ilmahaygu sameynayo horumar? Maxaan sameeyaa haddi aan dareemo in ilmahagu uuna sameyneynnin wax horumar ah. Maxaan sameeyaan haddii aannan ku qancin?

" IFSP" waxa loogu qorsheeyey in u sheego waxa isbeddel ah ee ilmahaaga adigu aad ka fili karto, sida soo cabbiri karo isbeddelka, iyo waxa u noqon doono wakhtiyada bar tilmmaamded u ah isbeddelkaas. Xubin ahaan qoys, waxaad tahay adigu qof aad aad ugu muhiim ah sidii loo garan lahaa natiijooyina iyo sidii loo garan lahaa sida waxqabadyadaasi ay si fiican ugu hagaagi lahaayeen waxyaabha aad qabtaan maalin kasta ilmahaaga iyo qoyskaaguba. Ugu yaraan , wax kasta oo ka soo baxa "IFSP"da waa in dib loo eegaa lixdii biloodba mar oo dib loo qoraa halkii sanaba mar. Carruurta qabta ASD, arrintan waa in la sameeyo intaa in ka badan, oo sida saddexdii biloodba mar oo kale. Inataa waxa ku dheeraad ah, wax ka soo baxa IFSP waa in loo qaybiyaa tallaabooyin la qiyaasi karo si horumarka lagu gaadhayo waxa soo baxa in la qiyaasi karo markasta oo fursad loo helo wax ka-qabashada. Xubin ahaan qoyska iy adiga oo xubin ka ah kooxda, wa in lagaa qayb galiyaa wada hadalka had iyo jeer dhaca ee ku saabsan sida heerka u ilmahaagu taagan yahay. La taliyeyaal ayaa jira oo laga dari karo barnaamij dib u fiirinta haddii aad ka welwelsantahay horumarka.

Ilmahaygu ma in u ku jiro barnaamij gaar oo "autism" miyaa in u ka qayb galo manhaj loogu talagaley carruurta laga helay "autism"ka?

Barnaamijyo gaar ahi laga yaabaa ineyna la kulmmin sharcigu waxa u rabo ee ah "agagaarka dabiiciga ah" am lagu sameeyo goobta carruurta aan lahayn talax-yaraantu sida caadiga ah looga helo. Carruurta leh ASD waxay ka faa'iideystaan la kulanka jiilkooda ee ugu habboon da' ahaan ee caadiga u kobcaya. Ilma kastaa waa shaqsi gaar ah oo baahi gaar ah leh. Dabiicga kala duwanaanshaha leh ee ASD awgeed iyo isku dhex jirka anshaxyada dhici kara, manhaj kaliya oo loogu hagaago ama barnaamij ahaan wax u qabanaya carruur oo idil ma jiraan. U fidinta adeegyada carruurta leh ASD wadar ahaantooda waxay u qaadaneysaa iney u wada baahan yihiin banaamijyo isku mid ah iyo adeegyo isku mid ah. Manhaj taageeraya ku guuleysiga shakhsi ahaan wax ku soo abaxey waa in la qaataa.

Barnaamijka Ubadku Ma-sugi Karaan miyey bixinayaan terabi ama daaweyn ka duwan oo ay ka mid yihiin tababarka wax-maqalka, terabiga wax-aragga, ama "cranial sacral" terabi oo la siiyo ilmahayga?

Maya. UMK wey ka gargaartaa qoysaska iney helaan macluumaad iyo akhbaar ku saabsan daaweyn ka duwan kuwa caadiga ah, laakin, kharashka kama bixiso adeegyadan ka duwan kuwa kale. Badiyaa kuwan waxa loo qaataa daaweyn wax ka-qabasho aan hoos iman UMK. UMK kama bixineyso kharash daaweyn aan la xaqiijin iney waxtar leedahay iyada oo saldhig looga dhiga cilmi baadhis. Shaqaalha UMK, oo ay wada shaqeeynayaan la taliyeyaal, ayaa la talinaya fidiyeyaasha iyo qoysaska hababka iyo ku hagaagitaanka ee qaybtan ka mid ah.

Ubadku Ma-sugi Karaan miyey kharash u bixisaa ilmahayga barnaamij "nooc cusub" oo ay ka mid yihiin "Discrete Trial", "Greenspan", "TEACCH", ama "Little Walden"?

Ku hagaagidda waxqabasho ee ay u qaataan ta habboon iney tahay kooxda IFSP, iyada oo ku dhisan akhbaarta qiimeynta/qiyaasitaanka, ayaa la hirgalinayaa iayada oo laga yaabe iney ku jiraan barnaamijyada ay ka mid yihiin kuwa kor ku qoran. Kooxda IFSP ayaa ka caawin qoysaska sidii ay u hirgalin lahaayeen barnaamijyada khaaska ah ee waxbarasho haddii la isyidhaa waa xulasha ugu waxtarka badan ee daaweynta. Inta ay le'ekaaneyso wakhtiga loogu talagalo waxbaritaanku ee ay kharashka bixiyaan UMK waxa qiyaasi doona kooxda oo waxa lagu dari doonaa IFSP. Barnaamijkani waxa u noqon doonaa mid kaliya oo ka mid ah qorshaha ilmaha oo waliba ay ku jiraan fursado ilmuhu u ku xirfado guud ahaaned si u agagaarka dabiiciga ah iyo dhex galka kuwa da'ada la midka ah ee soo kobcaya

Ilmahayga waxa cudurka ka heley dhakhtar xeelad gaar ku leh arrimahaas oo nagu waaniyey inaan ka shaqeyssiisanno la taliye arrimaas oo ka baxsan Barnaamijka Ubadku Ma-sugi Karaan si u noola taliyo ilmahayaga barnaamijkiisa UMK miyey kharashka bixinayaan?

Ubadadku Ma-sugi Karaan waajibaadkooda ma aha iney shaqo siiyaan ama lacag siiyaan la taliyeyaal dibadda ah haddii barnaamijku u leeyahay xeelladda dheeradka ah ee loo baahanyahay oo hirgalinaya waxa ay IFSP rabto UMK ayaa leh la taliyeyaal tababarran oo khibrad leh oo u jooga sidii ay ugacaawin lahaayeen kobictaanka barnaamijka waalidku waxay awood u leeyihiin iney ku marti qaadan ciddiii ay rabaan iney qayb-qaataan kulanka IFSP. Iyada oo ka mid ah kobicidda IFSP, shaqaalaha iyo taageerayaasha ayaa farta lagu fiiqi oo laga wada hadli.

Ayaa u qalma iney la shaqeeyaan ilmaha yar ee leh ASD?

Ma jiraan wax shahaado ah ama mawduuc qof ka dhigeysa in uu u qalmo in u la shaqeeyo ilmaha ay hayso ASD. Waxaan garaney in dabciyada iyo baahida aadka u kala duwan ee carruurta leh ASD ay badiyaa ugu baahan yihiin koox ka kooban shaqsiyaad la shaqeeya qoyska. Kooxdu waxay ka koobnnaan kartaa kuwa soo socda: macallin ku xeel dheer Hory wax-uga qabashada, horey wax-uga qabte, ama kal-kaaliye horey wax-uga qabte, qof xeelad ku leh hadalka/luqadda, qof shaqada terabigeeda yaqaan, dhakhtar cilmi-nafsi; iyo/ama shaqaale bulsho. Waxa muhiim ah in xubnaha kooxdu tababar iyo khibrad ku filan ay lahaadaan marka ay la shaqeynayaan carruurta leh ASD. Inta ugu badan, barnaamijyadyadu waxay leeyihiin shaqaale khibrad leh oo qayb ka qaadanaya barnaamijka guud si ay ula shaqeeyaan waxa ku jira qorshaha qoyska Haddii barnaamijku lahaan waayo shaqaale khibrad u leh hab ama tekniko gooni ah, UMK ayaa kaa caawin sidii loo heli lahaa dad khibrad u leh oo la taliaya oo marka siiya tababrkaas ama xirfada loo baahn yahay.

Maxaa ku dhici doona ilmahayga marka u noqdo saddex jir ee uuna qaadaneyn adeegyada ay bixiyaan Ubadku Ma-sugi Karaan?

UMK waxa laga rabaa in ay ka caawiyaan qoyskaagaa qorsheynta isbeddelka helidda adeegyadaugu yaraan lix bilood ka hor ilmahaagu marka u saddex jirsanayo. Barnaamijyo la kala xulan karo waxa ka mid dugsiyada dadweynaha, barnaamijyada dugsi ugu hereeye waxabarsho gaar ah iyo barnaamijyada kale ee beesha. Isu-duwaha adeeggaaga ayaa caawin kara sidii loo garan lahaa barnaamijyo kale oo laga dhex dooran karo beesha.

Waxa muhiim adiga kuu ah inaad garato in dhammaan degmooyinka dugsiyada Joorjia oo idil looga baahan yahay iney siiyaan carruurta talax-yaraanta leh ee da'doodu u dhaxeyso 3 ilaa 21, waxbarasho lacag la'aan ah ku habboon waxbarshada dadweynha si ay ula kulmaan baahidooda gaarka ah sidii loo hubin lahaa carruurtu le taalx-yaraanta in laga siiyo adeegyo iyo taageero dugsi degmoodkooda marka laga billabo saddex jir, qorsheynta iyo wada xidhiidhka ka dhexxya ilmahaaga barnaamijkiisa hore-wax uga-qabashada iyo shaqaalaha degmada dugsiga waa in uu horey uu dhaco intii la karo waxa lagugu waaninayaa inaan indha-indheyso waxyaabaha kula gudboon marka ilmaahaagu noqodo laba jir.

Waxqabayada ugu horeeya ee laga maarmaanka u ah nidaamka ka gudubka Waxa ka mid ah:

- La kulanka UMK, shaqaale dugsi, iyo barnaamijyada kale ee beesha sidii looga wada hadli lahaa qorsheynta akhbaarta looga baahan yahay gudbitaanka;
- Wadaagga macluumaadka arrinta khuseysa iyo kuwa cusubba, oo ay ka mid yihiin qiimeynta hadda jirta, qiyaasitaanka, iyo IFSP ee kooxaha la shaqeynaya ilmahaaga;
- Buuxinta xafiis ahaan waraaqda u direysa dugsiga degmada. Marka U diritaankaa la sameeyo, shaqaalaha nidaamka dugsiyadu, oo aad adigu weheliso, ayaa billabi kara nidaamka lagu garan karo in ilmahaagu xaq u leeyahay adeegyo tacliin gaar ah oo markaa haddii ay sidaa tahay, waxay yihiin adeegyadaasi.

Laga soo xigety *Connecticut Dhalashad ilaa saddex, Adeeg Tilmmaamo #1: PDD/Autism* iyo Fields V. Autism Advocacy in Lane County: Oregon: A Handbook for Parents and Professionals. Eugene, OR: University of Oregon: 1993. Thesis.

URURKA AUTISMKA AMEERIKA

Ururka Autismka Ameerika
7910 Woodmont Ave., Suite 650
Bethesda, MD 20814-3015
800-328-8476
www.autism-society.org

LAANTA JOORJIYA WEYNTA
2971 Flowers Road South, Suite 140
Atlanta, GA 30341
(770) 451-0954